



## Faa'iidada ugu qiimaha badani waa wakhtiga

Degmada Hennepin waxay bedeshay sida ay u bixino addeega taasoo u ogolaanaysa in dadka degan degmada ku xirnaadaan ayna ka cusboonaysiin karaan caawimada ay helaan meelkasta, markasta. Sida ugu badan, dadku waxay nagula soo xiriiri karaan taleefoon, ama internet umana baahna in ay yimaadaan dhismayaasha degmada.

### Bixinta fursado badan, fursado wanaagsan

Noloshu waa mashquul. Mana ahan in ay adeegyadu ku xirnaadaan jedwelada degmada iyo meelaha ay xafisyadoodu ku yaaliin.



#### Ka codso online

Taageerada dhaqaale: [MNbenefits.org](https://mnbenefits.org)

Taageradaas waxaa ku jira cuntada, lacagta, gergaarka degdega ah, xanaanada caruurta, taageerada guryaynta iyo daryeelka caafimaadka: [MNsure.org](https://mnsure.org)



#### Na soo wac wixii macluumaad iyo taageero ah

Waxaan leenahay shaqaale u diyaar ah inay kaaga jawaabaan wixii su'aalo ah kaalana shaqeeyaan meesha uu marayo arjigaagu. Waxaan diyaar u nahay in aan kaa qabano taleefoonka markaad na soo wacdid maalmaha Isniinta ilaa Jimcaha, 8 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo, taleefoonkan **612-596-1300**.



#### Soo xareynta/dirida dukumentiyada

- Ku soo rid [MNbenefits.org](https://mnbenefits.org)
- Iimayl [hhsews@hennepin.us](mailto:hhsews@hennepin.us)
- Fax **612-288-2981**
- U dir **Hennepin County Human Services Dept.**  
P.O. Box 107 Minneapolis, MN 55440

Haddii uusan qofku awoodin fursadahan, waxaa dukumentiga ku soo ridi kartaa sanduuqa loogu talagalay oo yaala meel kasta oo xarumaha addeegyada Aadanaha ah. (Human Service center)



# Si loo qaado caqabadaha hor taagan bixinta addeeg wanaagsan

Xayiraadaha COVID-19 waxay noo xaqiijiyeen in aan sii wadi karno addeegyada iyadoo aan lagu xireyn dadka degaanka in ay ku dhibaatoodaan gaadiidka, xanaanada caruurta iyo inay u fasax qaataan si ay noogu yimaadaan. Ilaa intii MNbenefit laga bilaabay Degmada Hennepin bishii Sebtembar 2020:

- 15,000 oo qof ayaa soo codsaday faa'iidooyinka dhaqaale iyagoo isticmaalaya arjiga shabakada ee MNbenefit.
- Qiyaastii waa 12 daqiiqadood inta arjiga lagu buuxin karo, marka la barbar dhigo in ka badan saacad haddii la isticmaalayo nidaamkii hore.
- Qiyaasta wakhtiga sugitaanaku waa ka yar yahay 3 daqiiqadood isticmaalida addeega taleefoonka.

Xog ururin lagu sameeyey dadka deegaanka oo ku saabsan:

- 99% waxay sheegeen inay ku qanacsan yihiin qalabka digitaalka ee taageerada dhaqaalaha.
- 82% dadka degaanka ah oo laga qaaday xog ururin waxay sheegeen in aad ugu qanacsan yihiin addeega ay taleefoonka ku helaan.

## Siinta dadka degaanka addeega ay u baahan yihiin

Waxay dadku yiraahdeen:

"waxaan ku mahadinayaa inaan leenahay ikhtiyaar aan ku xadidnayn maalmo iyo saacado gaar ah."  
Waad ku mahadsan khadka rajada nolosha.

"Run ahaantii, codsashadu way ka dhib yarayd hada siday markii hore ahayd."

"Waxaan ahay 76 sano jir arjigana waxaan dhamays tirtay dhib la'aan. Sahlan oo aan qoraal badan kaaga baahnayn."

"Gracias por las preferencias en Español."  
Thank you for choices in Spanish.

"Wax walba way ficnaayeen, dhib yaraayeen oo koobnaayeen."

